

Xcel Energy®
HADDA, WAXAA LA JOOGAA WAKHTIGA
BARO SIDA LOO DHIGAALSADO IYADOO LA ISTICMAALAYO TIJAABADA QIIMEYNTA EE FLEX, LGA BILAABO 1-DA NOOFEMBER

## LAGA BILAABO 1-DA NOOFEMBER, 2020, WAXAAD HELI DONNTAA HAB CUSUB OO AAD KU DHIGAALSATOO BIILKA TAMARTAADA..

Adoo dhex mushaaxaya caadigaaga cusub, waxaad kaydsan kartaa lacag, iyana. Marka la isticmaalayao Qiimeynta Flex, qiimaha korontada ayaa isbbedeli doonta iyadoo ku xiran waqtiga maalinta. Taas macnaheedu waa biilkaagu wuxuu ku xiran yahay inta ay tahay qiyaasta korantada aad isticmaasho iyo sidoo kale wakhtiga aad isticmaasho.




Qiimaha korantada xilliga qaboobaha ayaa dhaqan galayo laga bilaabo Oktoobar ilaa Maayo.
Qiimaha korantada xilliga xagaaga ayaa dhaqan galayo laga bilaabo Juun ilaa Sebtembar.

Si aad dhaqaaleynta uga dhigto mid fudud, adeegso dhejisyadan si aad adiga iyo qoyskaagaba u xusuusataan xilliyada ugu wanaagsan ee aad isticmaali kartaan qalabyada.

**MAXIMIZE YOUR SAVINGS: USE APPLIANCES BEFORE 3 P.M. OR AFTER 8 P.M.**

Xcel Energy®

**MAXIMIZE YOUR SAVINGS: USE APPLIANCES BEFORE 3 P.M. OR AFTER 8 P.M.**

Xcel Energy®

Marka la isticmaalo qiimaha Flex, waxaad lacag yar ka bixin doontaa korantada aad isticmaasho xilliga hore ee maalinta, xiliga dambe ee galabtii iyo habeenka gudahiisa, marka ay tamarta dabayshu badan tahay. Qiimaha korontada inta u dhaxeysa 3-da galabnimo iyo 8-da galabnimo maalmaha asbuucyaaqada ayaa sareyn doona—si loo muujiyo kharashka dhabta ah ee soo saaridda tamarta. (Sabtida iyo Axada iyo maalmaha ciidaha, kaliya saacadaha saxmaddu yar tahay iyo saacadaha saxmaddu dhexdhexaadka tahay ayaa khuseeya—kuma jiraan saacadaha saxmadda.)

## QIIMEYNTA CUSUB AYAA KAA CAAWIN KARTO INAAD DHIGAALSATO, WAXAYNA CAAWIN DHISIDA MUSTAQBAL NADIIF AH.

Xcel Energy waxay ku tijaabinaysaa Qiimeynta Flex 10,000 macaamiil oo adiga oo kale ah. Tijaabada Qiimeynta ee Flex waa la baajiyey horrantii gugan, laakiin hadda waxaad waxaad haysataa hab cusub si aad u kaydsato oo u hesho caadigaaga cusub. Barnaamijka tijaabada ah waxay dhaqangali doontaa 1-da Noofember, 2020, illaa 31-da Oktoober, 2022. Waad ka bixi kartaa tijaabada wakhti kasta, laakiin waxaan rajeyneynaa inaad tijaabisid si aan u wada dhisno mustaqbal tamar oo nadiif ah. Adigoo dhowr isbeddelo ku sameynaya howlahaaga…

- Waxaad dhigaalsan kartaa lacagta biilkaaga korontada.
- Waxaad xitaa caawin doontaa isticmaalka tamar la cusbooneysiin karo oo badan.
- Waxaad caawin doontaa ka fogaanshaha baahi ah in mustaqbalka la dhiso warshad koronto oo cusub.

Ma dooneysaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan barnaamijka Tijaabada Qiimaha ee Flex? Eeg **xcelenergy.com/FlexPricing**

## AALADO CUSUB, ARAGTIYO CUSUB OO KU SAABSAN ISTICMAALKAAGA TAMARTA.

Hadda waxaad adigoo adeegsanaya mareegtayada iyo app-kayaga telefoonka gacanta heli doontaa aalado cusub oo kaa caawiyo inaad qiyaastid isticmaalkaaga tamarta isla markaana ku siiyo tilmaamooyin kuu gaar ah oo aad ku dhigaalsato tamar iyo lacag. Haddii aadan horey ugu jirin My Account, is-diiwaangeli hadda si aad u xaqiijiso inaad heli karto dhammaan aaladaha cusub. Booqo **xcelenergy.com/MyAccount** si aad u bilowdo.

Kaga akhri macluumaadkan af Soomaali: **xcelenergy.com/PilotSoo**
Lea esta información en español en **xcelenergy.com/PilotEsp**

Qayb ka noqo dhaqdhaqaaqa geesinimada leh ee lagu nadiifinayo tamarta. Gaaritaanka yoolkayaga ah in aan siino dhammaan macaamiisha koronto 100% kaarboon la'aan ah sannadka 2050 micnaheedu waa in aan dhammaanteen maanta beddelno sida aan uga fikirno korontada. Iyadoo qayb ka ah Tijaabada Qiimeynta ee Flex, waxaad gacan ka geysaneysaa isticmaalka tamar la cusbooneysiin karo oo badan adigoo ka dhigayo korontada mid la isku halleyn karo oo la awoodi karo.



## MA RABTID INAAD KA QAYBQAADATID? DHIB MA LAHA.

Waxaad door an kartaa inaad ka baxdid qiimeynta cusub iyo barnaamijka tijaabada wakhti kasta inta lagu jiro labada sano ee Tijaabada Qiimeynta ee Flex.

Imayl u dir **inquire@xcelenergy.com**
Ama wac **800.895.4999**.

# HOOS AYAAN U DHIGI DOONAA BIILALKAAGU

## SIDA AAN KAAGA ILAALIN DOONO KORORKA BIILKA EE AAN LA FILANAYN

Celcelis ahaan, biilasha ka-qaybqaatayaasha tijaabada waxay qiyaastii ahaan doonaan sida ay maanta yihiin. Shakhsi ahaan, biilkaagu wuxuu ku xirnaan doonaa goorta aad isticmaasho iyo inta ay dhan tahay korantada aad isticmaasho, waxaadna fursad u heli doontaa inaad lacag dhigaaliso haddii aad isticmaasho tamar yar saacadaha saxmaddu jirto.

Waan ognahay inay tani ku sii soconayso ahaanshaha caqabad dhaqaale waqti dad badan, oo waxaan rajeynaynaa in aan ka faa'iidaysano fursadan cusub si loo kaydsado. Laakiin hadaadan dhigaalin, waxaan ku siin doonaa caymis sannadka ugu horreeya ee barnaamijka. Dhammaadka sannadka ugu horeeya, haddii biilashaada ay ka badan yihiin 10% in ka sarreeya waxa ay noqon lahaayeen marka loo eego qiimaha caadiga ah, waxaad heli doontaa deyn biileed u dhigma qaddar ka sarreysa 10% kaas.

Haddii aad ka diiwaangashan tahay Barnaamijka Caawinta Tamarta, waxaad haysataa fursad dhigaalin oo la mid ah, waxaana sidoo kale xaqiijin doonnaa in biilkaaga billaha ah uusan kordhin sanadka koowaad ee tijaabada. Haddii aadan dhigaalsan inta lagu gudajiro sanadka ugu horeeya, waxaad heli doontaa deyn biileed bil kasta oo aadan dhigaalsan, si biilkaaga looga dhigo intuu ahaan lahaa haddii la raaco qiimaha caadiga ah.


Si aad wax badan uga ogaato Barnaamijka Caawinta Tamarta, iimayl u dirir **inquire@xcelenergy.com** ama wac **800.895.4999**. Oo haddii ay dhib kugu tahay biximaha caadiga ah ee xisaabta Xcel Eneregy, fadlan nala soo xiriir. Waan kaa caawin karnaa samaynta qorshe bixitaan oo ku naasiba.

Ma dooneysaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ilaalinta biilka? Eeg **xcelenergy.com/FlexPricing**

Xcel Energy®


xcelenergy.com | © 2020 Xcel Energy Inc. | Xcel Energy is a registered trademark of Xcel Energy Inc. | 20-09-623

# SIYAABAHA WAX LOOGA DHIGAALSADO QIIMEYNTA FLEX*




## Dhigaali $3.50 bil kasta:

**Shid makiinada weel-dhaqida kahor inta aadan seexan, halkii aad ka shidi lahayd isla cashada kadib.**



## Dhigaali $6 bil kasta:

**Isticmaal qalabyada yaryar ee wax lagu karsado inta lagu jiro diyaarinta cuntada fiidkii maalmaha shaqada beddelkii aad isticmaali lahayd foornadaada korantada.**



## Dhigaali $4 bil kasta:

**Dharka dhaqo Sabtida iyo Axada ama maalintii maalmaha shaqada beddelkii habeenkii maalmaha shaqada.**

Sii samee waxyaabahan? Sii dadaal waayo waxaad lacag ka dhigaalin kartaa biilkaaga tamarta adigoo adeegsanayo Qiimeynta Flex.

Ma dooneysaa siyaabo dheeri ah oo aad dhigaalin ku sameeysato? Eeg **xcelenergy.com/FlexPricing**

* Kharashyada iyo dhigaalinada way kala duwanaan karaan iyadoo ku xiran tahay nooca qalabka, shidaalka, cimilada, dhaqanka, iwm. Dhigaalin ayaa la sameyn karaa xiliga dhar dhaqista haddii la isticmaalo qalajiyaha korantada. Tusaalooyinkaan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin sharaxaad oo looguma talagalin in lagu qiyaaso ama lagu xisaabiyo saamaynta biilka tamarta.

Xcel Energy®

xcelenergy.com | © 2020 Xcel Energy Inc. | Xcel Energy is a registered trademark of Xcel Energy Inc. | 20-09-623